

## **Erayga iyo Maanta Somtwt 0152**

### **Buur Siyoon**

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Buur Siyoon**. Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda, Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Bawlos. Sii dhegayso barnaamijka ka hadlaya **Buur Siyoon**. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

### **Song: Reel---Cut----**

Mararka qaar waxaad dareentaa in xaaladuhu ayan sidii hore kuu noynaynin; oo la soo gaaray wakhtigii isbeddel iman lahaa. Taasina waa sidii uu dareemay markii maalin ciise uu ka baxay macbudka ku yaalla Yerusaaalem. Injiilka sida Matayos u qoray 24 markii Ciise ka soo baxay macbudka ayaa xertu dareenkiisa u soo weeciyeen dhismihii Macbudka.

Wuxuuna Ciise ku yiri xertiisa sida ku qoran Injiika sida Matayos u qoray 24:1-2 oo leh: **"Ciise ayaa macbudka ka baxay, oo intuu tegayay ayaa xertiisii u timid inay tusaan dhismaha macbudka. Laakiin wuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Miyaydnaan waxyaalahan oo dhan arkaynin? Runtii waxaan idinku leeyahay, Halkan lagu dul dayn maayo dhagax dhagax kale dushiisa oo aan la dumin doonin."**

Taasina waxay ku noqotay xertii Ciise Masiix warbixin cajiib ah oo ay la yaabeen. Macbudka waa dhismo si qurux badan loo dhisay oo ballaaran. In la dhammaystirona waxay qaadatay 50 sannadood.

Markaasina waa dhisme ballaaran oo lagu qiyaasi karo garoomada ciyaaraha kubadda cagta. Ballarkuna wuxuu buuxiyey buurta dusheeda oo ahayd halki laga dhisay. Xaqiiqatan, Buur Siyoon, oo ahayd buur ku taalla Yeruusaalem, halkaasoo macbudka laga dul-dhisay ayaa u taagan inay tahay buurtii Ilaah.

Waana halka rugta u ah Ilaah ee dunidan. Macbudka wuxuu u taagnaa marka la eego fikirka ay qabaan Israa'iil, inuu ahaa Gurigii Ilaah. Qarankuna waa mid qodduus ah, oo Ilaah baana aasaasay qarankan. Dabeetana Ciise ayaa la yimid warbixin anfariir wadata oo wuxuu yiri:

**"Laakiin wuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Miyaydnaan waxyaalahan oo dhan arkaynin? Runtii waxaan idinku leeyahay, Halkan lagu dul dayn maayo dhagax dhagax kale dushiisa oo aan la dumin doonin."**

Haddaba, anigu waxaan tegay dhulka Israa'iil, oo dhagxantaas dhererkoodu wuxuu ahaa 14-ilaa 15 feet. Waxay ahaayeen dhagxaan aad u waaweyn, oo inta la qoray, la keenay goobta ay ka dhisan yihiin, dabeetana halkaa lagu dhisay. Haddaba, isla goobta dhagaxda laguma qorin, oo looma isticmaalin, buris iyo garweyn, waayo dhulku wuxuu ahaa meel qodduus ah, oo buuq iyo qaylo ayaa laga fogaanayaa.

Waxaa loo dhisayaa si ka duwan dhismayaasha kale. Haddaba, Macbudka iyo qaabka loo dhisay ee quruxda badan, iyo dahabka yaalla ayaa Ciise muujinayaa in la waayi doono. Taasina waa arrin naxdin badan, oo waxaan hubaa in xertu ay ka xumaadeen, oo waxaa suuragal ah inay yiraahdeen,

"Maya Sayidow, ha oggolaan in waxani ku dhacaan macbudka." Welibana, waxay garanayeen in Ciise runta ka hadlayey.

Waxay garanayeen in Ciise aanay ka ahayn hadal iska dheh ah, ama hadal layska soo tuuray, oo marar badan ayey arkeen wax kasta ee uu yiraahdo, si kastoo ay u cabsi badan yihiinba in la arko. Markaasina, waa inay ka murugoodaan oo gartaan inay dhacayso. Xaqiiqatan, taariikhda ayaa muujinaysa dabcan in Ciise hadalkiisu saxiix ahaa ama ku qumanaa.

Sannadku markii ahaa 70 sannadood Ciise kaddib, wax yar kaddib markii Ciise Samada galay, ayaa abaanduulihii ciidamadii Titus oo ahaa Emberaadoorkii weynaa ee reer Rooma wuxuu burburiyey Macbudka. Waxaa loo malaynayaa in Macbudka uusan qayb ka ahayn meelihii loo socday, oo lama doonayn in la burburiyo.

Waxaase abaanduuluhu uu la dirirayey Yuhuudda, oo sida qisooyinka qaar ay sheegayaan ayaa waxaa macbudka ku soo dhacay fallaaro habow ah, oo gudaha ayey u galeen waxaana halkaas ka bilowday dabka, kaasoo burburiyey Macbudka. Markaa macno ma leh sidii uu ku burburay, waxaase macnada leh waa in hadalkii Masiixa la kaamilay, waxayna ahayd calaamad sheegaysa in wax waliba ee dunida yaalla ay dhammaad leeyihiin iyo in Macbudka uu kaamilay dantiisii.

Macbudka, sida ku qoran kitaabka Axdigii Hore, Sulaymaan ayaa dhisay Macbudkii kowaad, wuxuuna u dhisay inay ahaato meel lagu ammaano, oo lagu caabudo Ilaah, waxaana jiray markaa iyada ah damaashaad iyo allabaryo loo bixinayey dembiga. Waxaa jira heeso, waana Sabuuradaha Axdigii Hore, waxaana la qaadi jiray xilliyada lagu jiro cibaadaysiga, Macbudkuna wuxuu Israa'iil u ahaa sida Luul dhexdooda ka iftiimaya. Laakiin, Macbudka wuxuu ahaa inuu qabto dan cayiman oo aan joogto ahayn.

Waxay ahayd meel Salaadeed, oo dembiyadana wax loogu bixiyo ilaa inta uu ka imanayo wax lagu beddelo. Bil xaqiiqa, Ciise taas wuu fahamsanaa oo wuxuu beddelay qaabkii hore ee caabudista Macbudka. Xaqiiqatan, Injiilka sida Matayos u qoray 12:6, waxaana uu yiri: **"Waxaan idinku leeyahay, Mid macbudka ka sarreeya ayaa halkan jooga."**

Wuxuu ka hadlayey wax ku saabsan shaqadiisa samatabbixinta. Mar kalena wuxuu yiri, isagoo ka hadlaya hawsha Sabtida, "Anigu waxaan ahay Sayidka Sabtida." Haddaba labadaas warbixin waa cajiib. Wuxuuna Masiixu sheeganayaa inuu ka weyn yahay xitaa macbudka oo ah dhisme loo sameeyey in Ilaah lagu caabudo, waana Ilaaha dhabta ah ee runta ah kan lagu caabudayo, Ciise Masiixna wuxuu yiri, arrinku intaas waa ka qoto dheer yahay.

Haddii aad doonayso inaad hoos u baarto arrinka, Ciise si cad buu u sheegayaa inuu ka weyn yahay macbudka, o ahaa halkii dadku ay qurbaannada keeni jireen, Ilaah ku caabudi jireen, oo Ilaah ugu adeegi jireen, Ilaah ku baryi jireen, oo masiixiyiintuna magaca Masiixa ayey Ilaah ku gaari karaan. Ciise Masiixna wuxuu yimid isla macbudkan, waana calaamad kale oo sheegaysa in xaalka caabudista uu faraha ka baxay, oo sidii hore ayan ahayn.

Waxaa macbudka laga dhigay suuq wakhtigii Ciise waxaana ka socday ganacsi halkaasoo xoolaha lagu kala ibsanayey, oo dadka wax bixinaya ayaa laga faa'iidayanayey marka ay u yimaadaan ciidaha waaweyn, maxaa wacay meelo fogfog bay ka iman jireen, iyagoo aan xoolo qurbaan lagu bixiyo wadanin. Dabeetana sicirka ayaa kor logu qaadi jiray. Laakiin suuqu wuxuu ahaa barxadda macbudka. Waxaana laysku daray Cibaadaysi iyo ganacsi.

Taasina wax wanaagsan ma ahayn. Markaasina Ciise wuxuu bilaabay inuu dadkii kala eryo sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray cutubka 2aad. Bal qiyaas Ciise oo kala eryaya dadkii halaas joogay oo jeedal wata, sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 2:15-16, waxaana qoran sidatan:

**"Markaasuu xadhko karbaash ka sameeyey, kulligoodna ayuu macbudka ka eryay, dibiyada iyo idaha labadaba, lacagtiina wuu ka daadiyey kuwii bedbeddelayay miisaskoodiina wuu rogay. Kuwii qoolleyaha iibinayayna wuxuu ku yidhi, Waxyaalahan halkan ka qaada. Guriga Aabbahay ha ka dhigina guri baayacmushtari."**

Haddaba waxaa qiyaasi kartaa sidii ay u caroodeen markii uu arkay niyadaha kharriban iyo sidii goobtii caabudista loogu baddelay suuq. Markii haddaba Ciise lala dooday, ayaa qaar wadaaddada ah waxay ka dalbadeen, "Waa maxay calaamadaha aad na tusayso, si aynu awooddaada aad wax ku samayso ku aragno." Cise ayaa ku yiri, "Dumiya macbudkan, anigana saddex maalmood gudahood ayaa ku dhisi doonaa."

Markaasaa Yuhuuddii waxay ku yiraahdeen, lix iyo afartan sannadood bay qaadatay in la dhiso macbudkan, adiguna ma saddex maalmood baad ku dhisaysaa?" Balse aysan garan wixii uu ula jeeday—sida abbaarta ah dadka badankiis ma aysan garan. Laakiin qoraalkan ayaa sharraxaya, laakiin macbudka uu ka hadlay waa jirkiisa, kaddib markii uu dhimashada ka sarakaco, oo sidaad og tihiin badankiin ee aynu ka barannay Injiillada, Ciise maalintii saddexaad ayaa dhimashadii laga sarakiciyey. Markii dhimashadii laga sarakiciyey, ayaa xertiisii waxay soo xusuusteen wixii uu ku yiri, dabeetana waxay rumaysteen Qorniinka iyo hadalladii Ciise

kula hadlay. Buur Siyoon waa midda laga dul dhisay macbudka, waana goobta macbudka ammaanta ee Ilaah ay ku taal. Macbudkaas isaga ah wuxuu ahaa mid aan joogto ahayn. Ilaah wuu garanayey in qurbaanka xolaha ay istaagi doonaan, Ciisena wuxuu noqday qurbaankii ugu dambeeyey ee dembiga ee iman doonay.

Wuxuu isku bixin doonaa Buur Siyoon, wuxuuna noqon doonaa qurbaankii ugu dambeeyey ee dembiga sidii uu yiriba, oo jirkiisa ayaa la burburin doonaa, oo maalinta saddexaad ayaa la sarakicin doonaa, taasoo noqotay caddayn muujinaysa inuu ka qiimi badan yahay wax kasta ee dunida yaal ee wax lagu caabudo; mana jirto meel ka mid ah dunidan oo ka muhiimsan in Ilaah lagula kulmo haddaanay ahayn baryada Ilaah ee Ciise la sii marsiinayo.

Waxaad hoos iman kartaa goob waliba oo aad doonayso ee wax lagu caabudo, laakiin Ilaah aqbali maayo, weliba salaaddaada la aqbali maayo haddaan la marsiinin magaca Masiixa. Waana sida keliya ee Ilaah lagu gaari karo. Macbudka cusub, iyo Yerusaalementa Cusub, iyo Siyoonta cusub waxaa leh masiixiyiinta ku jira Masiixa.

Waana halka aynu Ilaah kula kulmayno iyadoo Masiixa aan wadanno. Waxaana faallada Yerusaalementa cusub ay ku qoran tahay kitaabka Muujintii cutubyada 21-22. Waana Siyoonta Cusub, Samo iyo dhul cusub, caasimad cusub halkaasoo dadkii jacelaa Masiixa ay ugu imanayaan, oo awoodi doonaan inay jameecada la joogaan, iyadoo Masiixuna uu halkaas joogo oo ay Ilaah hor taagan yihiin.

Waa wax farxad leh in maalintaas laga fakaro, oo lala qaybsado asxaabtaada. Waa inaad ku dhiirrogelisaa inay Masiixa

Hortiisa joogi doonaan, oo cisayn doonaan, iyo inay qaabilaan, oo Masiixa hortiisa la yimaadaan salaad ka timid maskaxda iyo laabta, oo aad ciso iyo ammana hortiisa la timaaddaan, waayo isagu waa sayidkaaga, boqorka, waana inaad taas ogaato, oo aad siisaa ammaanta iyo cisada magaciisu mudan yahay.

**SONG: REEL-CUT--**

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.